

Caddaala

GOLAHA WAKIILADA



JAM. SOMALILAND

SOMALILAND HOUSE OF REPRESENTATIVES

Date: GC/ - 31/96
REF: 14-10-96

**GOLAHA WAKIILADA
WUXU ANSIXIYEH**

- MARKUU ARKAY = Qodobka II'aad Qaybta (T) fargadiisa
I'aad ee Axdiisga qaranka:-
MARKUU ARKAY = Baahida loo qabo Wasaaradda Caddaaladda
MARKUU ARKAY = Soo Jeedinta Golaha Kukumadda ee Xeer
Madaxweyne

WUXUU GOLUHU ANSIXIYEH SHARCIGGA DDA U
CADDAAALADDA NO. YAHA
31/96

Haddaba goluhu wuxuu sidiisa u ansixiyey sharcigga
kor ku xusan oo ka kooban 8 Qodob iyo Labo Bog:-



Faysal
(Faysal Axmed Maxamed)
=XOGHAYAHA GOLAHA WAKIILADA=

Xeer Madaxwene No: 8/96

MADAXWEYNAMA JAMHUURIYADDA SOMALILAND

- MARKUU ARKAY: Qodobka 14aad xubintiisa 1aad, 2aad, 3aad, iyo Qodobka 24aad ee Axdii Qarameedka JSL.
- MARKUU Tixgeliyey: Baahida weyn ee loo qabo dhismaha Guddiga Caddaalada (High Judiciary Council) si ay u gutaan xilkooda oo ah "Danta guud ee Caddaalada"
- MARKUU Aqoonsaday: Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Caddaalada iyo.
- MARKUU HELAY: Qogolaanshaha Golaha Wasiirada JSL.

Wuxuu soo saaray Sharciga hoos ku qoran:-

Qodobka 1aad

1. In dib loo dhiso Wasaaradda Caddaalada loona abuuro nidaam iyo maamul fulin kara xilkeeda weyn.
2. In Wasaaradda Caddaalada loo xilsaaro Maamulka Maxkamadaha Degmooyinka, Gobolada iyo Rafcaanka si hay'adaha Garsoorka loogu taageero ama loogu suuro geliyo fulinta garsoorka iyo qawaaniinta oo ay u leeyihiin madax bannaani buuxda.

Qodobka 2aad

Waxa kale oo Wasaaradda loo xilsaaray:-

- b) In ay xukuumada kalo taliso sharciga.
- t). In ay dhinaca qawaaniinta iyo sharciga ka difaacdo dawladda hadii dacwad lagu soo oogo dawladda.
- j) In ay talo ka bixiso ama ka keento arrimaha la xiriira qawaaniinta adduunka, marka loo baahdo.
- x. In ay guud ahaan noqoto xiriiriyaha xukuumadda iyo hay'adaha garsoorka, ayadoo intuba u adeegayaan caddaalada.

Qodobka 3aad

1. Maxkamada sare ee Qaranka waxa laga reebay Maamulka Maxkamadaha degmooyinka, Gobolada iyo Rafcaanka.
2. Maxkamada Sare ayadaa iskeed isku maamulaysa ayada oo uu Guddoomiyaheedu madax ka yahay maamulkeeda.
3. Waxay Maxkamada sare toos u heli doontaa Miisaaniyadeeda si waafaqsan nidaamka Miisaaniyada dawladda.

2.

Qodobka 4aad

Waxay Wasaaraddu ka shaqeyn doontaa nidaaminta (Regulate) iyo Diiwaan gelinta (registration) mihnada qareenimada (legal profession) iyo nootaariyaha (Notaries).

Qodobka 5aad

Ciidamada Asluubta iyo Arrimaha Xabsiyada iyo Agoomaha waxay hoos imanayaan Wasaaradda Caddaalada sidii ay hore u ahaan jirtay.

Qodobka 6aad

Waxay Wasaaraddu leedahay kaalin talo soo jeedin arrimaha la xiriira cafiska.

Qodobka 7aad

Xeer Kasta oo ka hor imanaya ama la socon karin xeerkan waa la tirtiray

Qodobka 8aad

Xeerkani waxa uu dhaqan gelayaa marka uu Madaxweynuhu saxeexo.



Maxamed Ibraahim Cigaal
MADAXWEYNAHA JSL